



Warbixinta

Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 38^{aad}

(From 27 August 2018 to 29 December 2018)

Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL

Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 38^{aad}

Kal-fadhigii 38^{aad}

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	38 ^{aad}	27/10/2018	29/12/2018

Mudanayaal,

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhiga 39^{aad} ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyana Waajibaadkeena Qaran, waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadii Golaha ee kal-fadhigii 38^{aad} oo dhamaystiran si aad u xasuusataan waxyaabihii inoo qabsomay iyo wixii inaga baaqday ee inoogu qorshaysnaa ajandahaas hore.

Kal-fadhigii 38^{aad} ee Golaha waxa u qabsomay waxyaabo badan oo aad u muhiima kuwaas oo ay ugu waynayeen Ansixintii 3 Xeer oo dhaqangalay, Ansixinta Odooroskii Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2019ka, Ansixinta Masuuliyiin Qaran iyo Waxyaabihii Gudiyadda iyo Maamulka Golahaba u qabsomay si aynu u dardargalino shaqada inoo qorshan *kal-fadhigan 39^{aad}*.

Warbixinada Golaha laga hor akhiraayay

Tar.	Warbixinta	Cid akhridey
03/11/2018	Warbixinta Guddida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Wakiilada	Md. Axmed Ducaale Bulaale Gudoomiyaha Xigeenka Guddida Joogtada iyo Anshaxa
04/11/2018	Warbixinta Wasiirka Wasaarada Boosaha, Isgaadhsiinta iyo tagnoolajiyada.	Md. Cabdiali Cabdilaahi Sh. Suufi Wasiirka wasaarada Boosaha isgaadhsiinta iyo Technolgy-yada
13/11/2018	Warbixinta Guddida Arimaha iyo Difaaca Gudaha ee Wax-ka Beddelka Xeerka Booliska	Md. Cabdilaahi Xuseen Cige (Balaaki) Gudoomiyaha Guddida
25/12/2018	Warbixinta Gudida Dhaqaalaha ee Miisaaniyada 2019-ka	Md. Cumar Axmed Saleeban (Sanweyne) Gudoomiyaha Guddida

Xeerarka uu Goluhu Ansixiyay

No	Mashruuc Sharciga la Ansixiyay	Taariikhda	Halka loo gudbiyay
1.	Ansixinta Wax-ka beddelka Xeerka Booliska	01/12/2018	Madaxweynaha
2.	Ansixinta Wax-ka beddelka Xeerka Qashinka	09/12/2018	Madaxweynaha
3.	Ansixinta Wax-ka beddelka Xeerka Ciidanka Ilaalada Xeebada	11/12/2018	Madaxweynaha
4.	Miisaaniyada 2019-ka	29/12/2018	Madaxweynaha

Masuuliyiintii Qaran ee Goluhu Ansixiyay

Kal-fadhigii 38^{aad} Masuuliyiinta Qaran ee Goluhu Ansixiyay waxay ahaayeen kuwo isugu jiray Xubnaha Komishanka Maamul Wanaaga, Xubnaha Komishanka Hay'adda Dhawrista Tayada iyo Wasiiro kuwaas oo kala ahaa sidan:-

Ansixinta Wasiirada Xukuumada.

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Md. Cismaan Jaamac Aada	Wasiirka Wasaarada Wax-barashada	15/12/2018

Xubnaha Komishanka Maamul-wanaaga

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Md. Axmed Jaamac Maxamuud	Xubin komishanka Maamul-wanaaga	11/11/2018
2.	Md. Cabdiqaadir X. Ismaaciil Maxamed	Xubin komishanka Maamul-wanaaga	11/11/2018
3.	Md. Maxamed Axmed Cawaale	Xubin komishanka Maamul-wanaaga	11/11/2018
4.	Md. Liibaan Ismaaciil Cabdilaahi	Xubin komishanka Maamul-wanaaga	11/11/2018
5.	Md. Dayib Aadan X. Cali	Xubin komishanka Maamul-wanaaga	11/11/2018

Xubnaha Komishanka Dhawrista Tayada.

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Md. Muuse Yuusuf Aadan	Xubin komishanka Dhawrista Tayada	12/11/2018
2.	Md. Faysal Maxamed Siciid	Xubin komishanka Dhawrista Tayada	12/11/2018
3.	Md. Cali Sheik Maxamuud	Xubin komishanka Dhawrista Tayada	12/11/2018
4.	Md. Xassan Maxamud Maxamed	Xubin komishanka Dhawrista Tayada	12/11/2018

5.	Md. Maxamed Ismaaciil Dhinbiil	Xubin komishanka Dhawrista Tayada	15/12/2018
6.	Mrw. Amaal Cabdi Xassan	Xubin komishanka Dhawrista Tayada	15/11/2018

Ansixintii Odooroska Miisaaniyada Sanadka 2019ka

22 December 2018 ayaa waxaa Golaha Wakiilada la horkeenay odooroska Miisaaniyada Qaranka ee 2019, Waxaana Warbixinta Miisaaniyadaas ka hor akhriyay Wasiirka Wasaarada Maaliyada **Dr. Sacad Cali Shire** oo Guud ahaan uga warbixiyay Xildhibaanada waxa ay ku saabsantahay miisaaniyadu iyo meelaha xooga la saarayo sanadka soo socda.

- Wasiirku waxa uu sheegay in ugu horayn Miisaaniyadu ay ka koobantahay
- Miisaaniyadda Dawladda Dhexe,
- Miisaaniyadda Hayadaha Madaxa banaan ee Dawladda ,
- Miisaaniyadda Dawladaha Hoose,
- Miisaaniyada Sanduuqa Horumarinta Somaliland ee ay maalgeliyaan wadamada Deeqbixiyeyaashu (Somaliland Development fund).

Isugeynta guud ee miisaaniyada sannadka 2019 waa **2,334,320,463,251** sida shaxda hoose ka muuqata. Miisaaniyadda dawladda dhexe waa **1,823,975,720,000 SLSH**, taas oo ka badan tii hore **136,975,720,000 SLSH** oo u dhiganta 8%.

Dakhliga Miisaaniyadda 2019

Magaca	2018	2019	Faraqa
Miisaaniyadda Dawladda Dhexe	1,687,000,000,000	1,823,975,720,000	136,975,720,000
Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa Banaan	115,504,536,652	160,756,179,150	45,251,642,498
Miisaaniyadda Dawladaha Hoose	284,419,791,039	255,490,228,023	-28,929,563,016
Miisaaniyadda Sanduuqa Horumarinta	79,598,658,078	79,598,658,078	0
Miisaaniyadda Mashaariicda Baanka Aduunka	45,704,269,080	0	-45,704,269,080
Miisaaniyadda Mashruuca JPLG	52,260,000,000	14,499,678,000	-37,760,322,000
Total	2,264,487,254,849	2,334,320,463,251	69,833,208,402



Sida oo kale wasiirku waxa uu ka hadlay siyaasada Miisaaniyada 2019, Isagoo sheegay in Siyaasada Miisaaniyadani ay si cad u tilmaamaysa bartilmaameedka miisaaniyadda 2019, taas oo ku salaysan qorshaha horumarinta ee qaranka (**NDPII**) iyo balanqaadka xisbiga talada dalka haya ee Kulmiye, waxaana ka mida qodobada muhiimada ay saarayso Miisaaniyadda 2019.

1. Amniga
2. Xoojinta Tayeynta Garsoorka
3. Waxbarashada, Biyaha & Caafimaadka
4. Xoolaha, Kalluunka & Beeraha.
5. Aqoonsi Raadiska
6. Doorashooyinka
7. Kaabayaasha Dhaqaalaha
8. Tamarta & Macdanta
9. Deegaanka & Aafooyinka
10. Daryeelka Shaqaalaha
11. Xog ururinta.

Intaas ka dib waxaa isla Maalintaas lagu wareejiyay Miisaaniyada Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada. Waxayna Gudidda Dhaqaaluhu Warabixintooda ku saaabsan Miisaaniyada Golaha ka jeediyeen **22 December**, intaas ka dibna isla fadhigaas ayay Mudaanayaasha Goluhu dood ka yeesheen Miisaaniyada, dooddaas oo malaintaas kaliya socotay. **29 December 2018** ayuu Goluhu Ansixiyay Miisaaniyadda iyadoo la raaciyaya Soo jeedintii Gudidda Dhaqaalaha ee Golaha u soo jeedisay. Fadhigaas oo ay ka soo xaadireen **60 Xildhibaan**, waxaana ansixinta Miisaaniyada cod gacan taag ah ku ogolaaday 46 Mudane, halka 12 Mudane ka diideen, hal mudane uu ka aamusay, Sidaasna Wuxuu Golaha Wakiiladdu ku ansaxday Odooroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanakda 2019ka oo lagu ansixiyay soo jeedinta Gudidda dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada JSL.

Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah

Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan

No	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Xawaaladaha	Gudidda Dhaqaalaha
2.	Xeerka Dhaqaalaha Shidaalka	Gudidda Dhaqaalaha
3.	Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
4.	Xeerka Macdanta	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
5.	Wax ka badalka Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
6.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
7.	Wax ka badalka Xeerka Doorashada Guud iyo D/galinta	Gudidda Arrimaha Gudaha
8.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha
9.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada
10.	Waxa ka badalka iyo kaabista Xeerka Ciqaabta Guud	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
11.	Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
12.	Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka	Gudidda Joogtada iyo Anshaxa
13.	Wax ka badalka Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka	Gudidda Arrimaha Gudaha
14.	Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada	Gudidda Arrimaha Gudaha

Xeerarka GoleWaynaha Horyaal

15.	Xeerka Maydhista Lacagta	Akhriski labaad
-----	--------------------------	-----------------

Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada

Guddida Joogtada iyo Anshaxa

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladda waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro.

Guddida Joogtada iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah ee xil-gudashada hawlaha qaran, iyadoo ka duulaysa muhiimada ay leeyihiin hawlaha qaran ee ay u hayaan Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Madax-Banaani Ee Dawlada, Waxa ay mudanayaasha Guddida Joogtadu kulamo xog-waraysi la yeesheen warbixino kala duwana ka dhagaysteen masuuliyiinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka qaar ka mida.

Waxay kulamo Xog-Waraysi Guddidu la yeelatay:-

1. Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka Iyo Wacyi Gelinta Jsl
2. Wasiirka Wasaaradda Macdanta Iyo Tamarta Jsl
3. Wasiirka Wasaaradda Degaanka Iyo Horumarinta Reer Miyiga
4. Maareeyaha Guud Ee Hay'ada Duulista Iyo Madaarada (Booqasho Cigaal International Airport).

Guddida Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Guddidu Kal-fadhigii 38^{aad} ee Golaha Wakiilada waxay guddidu Gacanta ku hayaan oo mudooyinkii u danbeeyay ay ku hawlanaayeen ama ay ka shaqaynayeen Xeer Nidaanka Garsoor oo meel fiican u maraya ayna ku talo jiraan in ay Golaha u soo gudbiyaan fadhiga 29^{aad} hadii alle yidhaa.

Guddida Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Kal-fadhigii 38^{aad} ee Golaha Wakiilada waxyaabihii guddida u qabsoomay waxaa ka mid ahaa:-

22 October 2018 waxay Guddidu Safar Shaqo ugu baxday Gobolada dalka si ay u soo kormeeraan illaha dakhli ee dalka, iyadoo ujeedda safarku ahayd inay soo eegaan halka ay marayaan hawlaha dakhli ururinta.

27-28 November 2018 Waxay Guddidu Kulan wadatashi Dadweyne u qabatay Laba Xeer oo kala ahaa Xeerka Maydhista Lacagta iyo Xeerka Xawaaladaha, Kulankaas oo ujeedadiisu ahayd sidii Dadwenaha kala duwan loogu soo bandhigi lahaa Xeerarkan iyaguna wixii ay fikir iyo talo hayaan ugaga qayb qadan lahaayeen.

Sidii kale markay taariikhdu ahay **25 December 2018** Waxa ay guddidu Gola waynaha u soo Gudbisay warbixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2019-ka.

Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah

Guddida Deegaanka iyo khayraadka Dabiiciga ah ee Golaha Wakiiladu waxay kal-fadhigii 38aad ka soo talo bixisay Hay'ada Dhawrista Tayada oo ay Golaha u soo gudbisay si loogu ansxiyo xilka uu Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland u soo magacaabay.

19-11-2018 Guddida Deegaanka iyo khayraadka Debiiciga ahi waxay kulan is xog-waraysi ah la yeelatay Gudoomiyaha Hay'ada Dhawrista Tayada, oo ay ka waraysatay hawlaha shaqo ee ay qaranka u hayaan, kulankaas oo ka dhacay xarunta Guud ee Golaha Wakiilada.

10-12-2019 Guddida Deegaanka iyo khayraadka Debiiciga ahi waxay kulan is xog-waraysi ah la yeelatay Wasiirka Macdanta iyo Tamarta, u jeedaha kulankaas oo ahaa sidii loo dar-dar galinlaa Xeerka Macdanta oo ay ka wada shaqaynayaan wasaarada iyo gudidu, kulan kaas oo ka qabsoomay Xarunta Golaha wakiilada.

20-12-2019 Guddida Deegaanka iyo khayraadka Debiiciga ahi waxay Safar shaqo oo u jeedadiisu ahayd Dar-dar galinta xeerka macdanta, ugu baxeen Gobolka Awdal magaalo madaxdiisa Boorame.

23-12-2019 Guddida Deegaanka iyo khayraadka Debiiciga ahi waxay Safar shaqo oo u jeedadiisu ahayd Dar-dar galinta xeerka macdanta, ugu baxeen Gobolka Saaxil magaalo madaxdiisa Berbera.

Guddida Arrimaha Bulshad iyo Diinta

10-11- 2018-ka Guddida Arrimaha Bulshado iyo Diinta ee Golaha Wakiiladu waxay kal-fadhigii 38aad ka soo talo bixisay Wasiirka wasaarada wax barashada, Sayniska iyo Tignoolajiyada oo ay Golaha u soo gudbisay si loogu ansxiyo xilka uu Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland u soo magacaabay.

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

17-18-/0/2018 Guddida Arrimaha Gudaha Difaaca Iyo nabadgalyadu waxay qabatay kulan wadatashi Dadweyne oo lagu Gorfaynaayo doorka Haweenka iyo Dhulinyarada ee kaqaybgalka siyaasada kas oo ka qabsoomay hoolka shirarka ee Golaha wakiilada.

30-31/12/2018 Guddida Arrimaha Gudaha Difaaca Iyo nabadgalyadu waxa ay qabatay kulan lagu gorfaynaayay wax ka bedelka iyo kaabista xeerka Ismaamulka Gobolada iyo degmooyinka jamhuuriyadda Somaliland xeer lr: 23/2002, kulan kaas oo ka dhacay hotel mansoor.

02/11/2018 Guddida Arrimaha Gudaha Difaaca Iyo nabadgalyadu waxa ay Golewaynaha u soo gudbisay warbixinta wax-ka-bedellka iyo kaabixta xeerka ciidanka booliiska

Somaliland, xeer Ir. 63/2018 war bixintaas oo uu gudoomiyaha guddidu ka hor akhriyay Golaha Wakiilada JSL.

Guddida Hawlaha Guud iyo Gaadiidka

Dec-11-2018. Guddida Hawlaha Guud & Gaadiidku waxay kullaan xog-wareysi ah la yeelatay wasiirka wasaaradda Gaadiidka & Horumarinta waddooyinka.

Sidoo kale guddida Hawlaha guud iyo Gaadiidku waxa ay ka soo shaqaysay xeerka Asaaska Hay'ada waddooyinka oo ay Golaha u soo gubisay Xeerkaas oo markii dambe dib loogu celiyay Xukuumada.

Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka (Public Accountant Committee) ee Golaha Waxay **19/12/2018**, waxay Guddidu kullaan la yeelatay Hanti dhawrka Guud ee Qaranka, kulanka oo u jeedadiisu ahayd inuu xogdheeriya ka siiyo Guddida Warbixinta Xisaab xidhka 2017-ka ee uu soodiyaariyey Hantidhawrka Guud ee Qaranka, iyaga oo su'aalo ka weydiiyey dhammaan qaybaha faah-faahinta u baahnayd ee Xisaab xidhka 2017-ka.

28/12/2018 waxay Guddidu kullaan la yeelatay Madaxa mashruuca dib u haynta Maaliyada ee PFM. Si loo sii xoojiyo wadashaqaynta Guddidu la leedahay xafiiska PFM-ka.

04/2/2019 waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka kullaan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada iyo Xisaabiyada Guud, kulankaas oo daarnaa sidii la isula sixi lahaa dhammaan kakhalaadka Xisaab eed ee soo baxa marka la diyaariyo Xisaab xidhka Qaranka ee Miisaaniyada Goluhu ansixiyo.

Wacyigalin iyo Baraarujin (outreach) Shaqada Golaha ku saabsan oo la qaaday

22 ilaa 26 December 2019 Saraakiil ka tirsan Golaha Wakiilada JSL ayaa Maalmahanba waxay Wacyigelin bulsheed ka wadeen qaar ka tirsan Gobolada dalka, wacyigelintan oo ku saabsan Ku bararujinta bulshada ee Shaqada baarlamaanka iyo doorka uu ku leeyahay dalka.



Ujeeddada Barnaamijkan aqoonta Bulshadu u leedahay Shaqada G/Wakiilada iyo in Sare loo qaado Xidhiidhka Ka Dhexeeyo Golaha Wakiiladda iyo Shacabka waxay ahayd:-

- ✓ In Golaha Wakiiladu Xaqiijyo Sugnaanshaha Warbixinta ay Soo Saareen Ururradda Bulshade 2016-kii, Taasoo ay ku Tilmaameen Inuu Hooseeyo Fahamka Guud Ee Shacabka Reer Somaliland Ka Haysto Shaqada iyo Waajibaadka Golaha Wakiiladda, iyo
- ✓ In Sare Loo qaado Xidhiidhka Ka Dhexeeyo Golaha Wakiiladda iyo Shacabka Soo Doortay, si ay u Fahmaan Shaqada Golaha.

Laba Kooxood oo isugu jira Agaasime Waaxeedyada golaha iyo la taliyayaasha Golaha ayaa u kala baxay Gobolada Bariga iyo Galbeedka, kooxda Gobolada Barriga u baxay waxay tageen Magaalooyinka iyo Tuulooyinka kala ah:-

- Degmda Abdaal.
- Degmada Qayta
- Degmada Burco
- Tuulada Qoryaale
- Degmada Caynabo
- Tuuladda Habari heshay

Halka Gobolada Galbeedka u baxday tageen Magaalooyinka iyo Tuullooyinka kala ah:-

- Degmada Arabsiyo
- Tuulada Abaarso
- Tuulada Kala-baydh
- Tuulada Illmo Deddo
- Degmada Borama
- Tuuladda Aways
- Degmada Qol-ujeed

Bulshada deegaamada kala duwan iyo tuulooyinka ayay isu soo baxyo wacyigelined ka wadeen taas oo ay bulshada ugu faahfaahiyeen shaqada Baarlamaanku qaranka u hayo.

Xildhibaanada Gobolka Saaxil laga soo doorto oo Kormeer ku tagay Gobolkaas

22 December, 2018 Golaha Wakiiladda ee laga doorto Gobolka Saaxil, waxay safar shaqo ku yimaadeen Gobolka saaxil casimadiisa berbera, iyagoo ujeeddada safarkooduni ahaa xog-ogaal u noqoshada dadkii soo doortay iyo deegaanadii laga doortay marxalada ay ku suganyihiin.



Xildhibaanada Gobolka Saaxil laga soo doortay oo kormeeraya halka Dekada cusub loo baneeyay

Mudaddii ay Xildhibaanadu Gobolkaas ku sugnaayeen waxay kulamo la yeesheen maamulada soo socda iyagoo sidoo kale kormeero ku soo sameeyay:-

- Dekada Magaalada Berbera iyo Maamulkeeda
- Madaarka Magaalada Berbera iyo Maamulkeeda
- Isuduwayaasha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawlada ee heer Gobol

Kulamada kala duwan ee ay la yeesheen Masuuliyiinta kala duwan ee goobahaas aan soo sheegnay waxay ka xogwaraysanayeen shaqadoodu siday u socoto, waxyaabihii u qabsoomay, baahiyaha ay qabaan, hadii ay jiraan waxyaabo caqabado ka haystaan iyo guud ahaan waxyaabaha mid kasta u qorshaysan, sidoo kale kormeerka ay ku soo mareen goobahaas waxaa ka mid ahaa kormeer ay ku soo indho-indhaysay siday shaqada dekadu u socoto iyo halka laga wado dhismaha dekada cusub, madaarka magaalada Berbera iyo siduu u shaqaynayo iyo laamaha hay'addaha dawlada ee Gobolka.



Kooxdan Xildhibaanada Gobolka Saaxil laga soo doortay waxay safarkoodani qaatay mudo 3 cisho ah, iyadoo guud ahaan wixii safarka uga soo baxay Warbixin ay ka soo diyaariyay isla markaana Golaha u soo gudbiyay, warbixintaas oo xambaarsanayd waxyaabihii ay Gobolka ku soo arkeen sida xaalada nololeed ee Bulshada Gobolka, siday u shaqaynayaan laamaha Dawlada ee heer Gobol sida Dekada, Madaarka iyo Maamulka heer Gobol, caqabadaha ama baahiyaha laamahaas kala duwan ee dawlada haysta ama ka jira.

Xoghayaha Guud oo Kulamo Dardergalin Shaqo ah la yeeshay Agaasimayaasha Waaxyaha iyo La-taliyaasha.



22 Janaury Illaa 05 February 2019 Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL Md Cabdirisaaq Siciid Wuxuu kulamo lagu dar-dargalinayo shaqada Waaxyaha Golaha la qaatay Agaasime Waaxeedyada iyo La-taliyayaasha Golaha Wakiilada kulamadaas oo ujeedadoodu ahaa sidii loo xoojin lahaa shaqada Waaxyaaha iyo Xafiiska La-taliyayaashu Golaha u hayaan waxaana kulamadaas Xoghayaha maalinba uu waax la kulmayay lagu eegayay:-

- Waax kasta Waxyaabaha ay qabato ee ay Maamulka Golaha u qaabisan tahay,
- Waxyaabaha Waax kasta u qabsoomay
- Waxyaabaha Waax kasta u qorshaysan iyo
- Halka la doonayo in la gaadhsiiyo ama la hiigsanayo
- Baahiyaha Waax kasta ay qabto iyo caqabado hadii ay jiraan,

Haddaba, muddadii labada todobaad ee Kulamadani Xoghayaha Guud la yeelanayay Agaasinka Waaxyaha iyo la-taliyayaasha waxaa si qoto dheer loogu falan-qeeyay halka shaqada qaybta Maamulka Goluhu Maanta marayso iyo waxyaabaha ka dhiman, sidoo kale waxaa la qodobeeyay waxyaabaha la qaban karo ee lagu talaabsan karo sanadka 2019ka iyo

sidii waax kasta qaybteeda uga qaadan lahayd waxyaabaha ay qaabilsan tahayna dhankeedda uga fulin lahayd.



Kulamadan oo laga sameeyay Warbixinta qaybta fulinta Maamulka Golaha oo Xoghayaha Guud Masuul ka yahay taas oo lagu soo bandhigayo Qaybta Maamulka Goluhu waaxyaheedda, waxyaabihii u qabsoomay iyo in loo baahan yahay in halkaa laga sii amba qaado horumarinta shaqada iyo waajibaadka qayb kasta, iyadoo waxaa ka soo baxay kuladaas shaqo ee socday mudadda labada todobaad ah ay ugu muhiimsanaayeen.

- In dib u eegis lagu sameeyay nidaamka shaqo dhamaan waaxyaha lana darsay sidii loo heli lahaa in Waax kasta yeelato nidaam iyo hab-raaco shaqo.
- Waxaa la sameeyay Qorsheyaal ay waax kasta ku shaqaynayso lagu lana xisaabtamayo
- In la daabaco 3 Buug oo Hadal-qoraal (Hansard Bond Volumes) ka kooban 3 buug.
- In la soo saaro Warbixintii Sanadkii 2018kii oo is casriya loo diyaariyay loona daabacay.
- In la nidaame Hage loo raaco sida loo qabanayo Shaqo maalmeedka iyo Hab-qoraalka Golewaynaha iyo Gudiyada
- Waxaa la sameeyay oo dib loo casriyeeyay mareegtii Golaha (Website) iyadoo qaabka ay Baarlamaanadu caalamku u shaqeeyay lagala mid dhigay, isla markaana si joogto loo galiyo Dukumentiyada Golaha sida Xeerarka iyo Xeerarka kala duwan ee maraan, Warbixinada Golaha iyo dhamaan Qoraalada si rasmiya Golaha uga soo baxa si bulshadu toos ugula socota shaqada Golaha ka socota, iyo

- In Todobaad kasta maalinta Khamiista ah la qiimeeyo waxyaabaha ka qabsooma qorshayaashaas iyo qiimeyn iyo dabagal joogta ah loogu samayn lahaa.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.